

Qodobada UNCRC

Ilaalinta xuquuqda carruurta iyo dhallinyarada

Xuquuqdaada waxaa laga heli **karaa Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta, ama UNCRC**. Mid ka mid ah qodobada heshiiska waa in la ogaado oo la hubiyo in dadka ku nool Scotland inay fahmaan waxyaabaha ku saabsan heshiiskan.

Qodobada UNCRC

Qodobka 1

Qof kasta oo 18 jir ka yar ayaa xuquuqdan leh.

Qodobka 2

Waxaad xaq u leedahay in aad ka badbaado takoorid.

Qodobka 3

Dadka waaweyn waa in ay sameeyaan waxa kuu fiican.

Qodobka 4

Waxaad xaq u leedahay in xuquuqdaada dowladdu ka dhigto mid dhab ah.

Qodobka 5

Waxaad xaq u leedahay inay waalidiinta iyo qoyskaagu ku siiyo hanuunin.

Qodobka 6

Waxaad xaq u leedahay inaad nolaato.

Qodobka 7

Waxaad xaq u leedahay inaad yeelato magac iyo jinsiyad.

Qodobka 8

Waxaad xaq u leedahay inaad yeelato aqoonsi.

Qodobka 9

Waxaad xaq u leedahay inaad waalidkaa la noolaato haddii aanay shar kuu ahayn.

Qodobka 10

Haddii adiga iyo waalidkaa aad kula nooshihiin laba dal oo kala duwan, waxaad xaq u leedahay inaad dib isugu tagtaan oo kuwada noolaataan meel.

Qodobka 11

Waa in aan lagu afduubin.

Qodobka 12

Waxaad xaq u leedahay ra'yi iyo in lagu dhegaysto oo si dhab ah loo qaato.

Qodobka 13

Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato wax oo waxay kula tahay ka tiraahdo waxa aad u malaynayso, iyada oo loo marayo samaynta farshaxanka, hadalka iyo qorista haddii aanay jabinayn xuquuqda dadka kale.

Qodobka 14

Waxaad xaq u leedahay in aad ka fikirto waxa aad jeceshahay iyo inaad qaadata diinta kasta oo aad rabto adiga oo raacaya hanuunka waalidka.

Qodobka 15

Waxaad xaq u leedahay inaad la saaxiibo noqoto oo ku biirto ama samayso kooxo, haddii aanay tani jebinayn xuquuqda dadka kale.

Qodobka 16

Waxaad xaq u leedahay nolosha gaarka ah. Tusaale ahaan, waxaad yeelan kartaa xusuus qor aan dadka kale loo ogolaan inay arkaan.

Qodobka 17

Waxaad xaq u leedahay inaad macluumaadka ka soo ururiso warbaahinta

Qodobka 18

Waxaad xaq u leedahay inay ku koriyaan waalidkaagu haddii ay suurtagal tahay.

Qodobka 19

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo in lagu dhaawaco ama si xun laguula dhaqmo.

Qodobka 20

Waxaad xaq u leedahay ilaalin gaar ah iyo caawin haddii aanad la noolaan karin waalidkaaga.

Qodobka 21

Waxaad xaq u leedahay daryeelka ugu fiican haddii lagu korsanayo ama aad ku nooshahay daryeelka korinta.

Qodobka 22

Waxaad xaq u leedahay ilaalin gaar ah iyo caawin haddii aad tahay qaxooti.

Qodobka 23

Haddii aad naafo tahay, maskax ahaan ama jidh ahaan, waxaad xaq u leedahay daryeel gaar ah iyo waxbarasho.

Qodobka 24

Waxaad xaq u leedahay caafimaadka ugu wanaagsan ee suurto gal ah iyo daryeel daawayn iyo macluumaad.

Qodobka 25

Waxaad xaq u leedahay in xaaladahaaga nololeed loo hubiyo si joogto ah, haddii aad guriga ka maqan tahay oo ku nooshahay meel ka fog.

Qodobka 26

Waxaad xaq ugu leedahay caawimaad dowladda haddii aad tahay dadka saboolka ah ama baahan.

Qodobka 27

Waxaad xaq u leedahay nolol caadi ah oo ku filan noolal wanaagsan.

Qodobka 28

Waxaad xaq u leedahay waxbarasho.

Qodobka 29

Waxaad xaq u leedahay waxbarasho korinaysa shakhsiyadaada, ixtiraamka xuquuqda dadka kale iyo deegaanka.

Qodobka 30

Haddii aad ka tirsan tahay dadka laga tirada badan yahay waxaad xaq u leedahay inaad ku raaxaysato dhaqanka adiga kuu gaarka ah, ku dhaqanto diintaada adiga kuu gaar ah oo aad isticmasho luqadda kuu gaarka ah.

Qodobka 31

Waxaad xaq u leedahay inaad ciyaarto oo ku nasato waxyaabaha sida cayaaraha, musikada iyo jilidda samaynaya riwaayadaha.

Qodobka 32

Waxaad xaq u leedahay ka ilaalin shaqada taas oo caafimaadkaaga u xun ama waxbarashada.

QODOBKA 33

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo daroogo khatar ah.

QODOBKA 34

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo xadgudubka galmada.

Qodobka 35

Ma jiro qof loo ogol yahay inuu ku afduubo ama ku iibiyo.

Qodobka 36

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo nooc kasta oo kale oo dhiig-miirasho ah.

Qodobka 37

Waxaad xaq u leedahay in aan lagu cigaabin hab naxariis lahayn ama xanuun leh.

Qodobka 38

Waxaad xaq u leedahay ilaalinta xiliyada dagaalka. Haddii ka yar tahay 15, waa in aadan marnaba ka qayb galin ciidamada ama dagaal.

Qodobka 39

Waxaad xaq u leedahay in lagu caawiyo haddii aad dhaawacanto, lagu baylihiyo ama si xun laguula dhaqmo.

Qodobka 40

Waxaad xaq u leedahay in lagu caawiyo si aad naftaada u difaacado haddii lagu eedeeyo sharci jabin.

Qodobka 41

Waxaad xaq u leedahay xuquuq kasta oo sharci kuwaas oo ka jira dalkaaga ama caalami ah oo ku siinaya xuquuq ka wanaagsan kuwan.

Qodobka 42

Dhamaan dadka waaweyn iyo carruurtuba waa in ay ogaadaan waxyaabaha ku saabsan heshiiskan.

Qodobo dheeraad ah

Qodobada 43 - 54 waxay ku saabsan yihiin sida dawladuhu iyo ururrada caalamiga ah ula shaqeyn doonaan carruurta si loo siiyo xuquuqda ay leeyihiin.

Xiriiro

Qoraalkan qodobada UNCRC waxaa soo saaray [Save the Children](#).

Eeg qoraalka qodobada UNCRC ee ay soo saareen annaga iyo [Scottish Government](#).